



ILAYS



VOL. 2 | CADDADKA 103aad | ARBACA 03 MAARSO 2010 | Tell:-252-090707034 | QIIMAHA:-6000 Ssh

Madaxweyne Faroole Oo Isku Shaandhayn iyo Isbedel Ku Sameeyay Gollahiisii Wasiirrada, Wasiiro Cusubna Magacaabay



Wariyayaasha/Ilays

Madaxweynaha Dowladda Puntland Md C/raxmaan Maxamed Maxamuud (Faroole) ayaa Habeenkii Isniintii, 01,02,2010 isku shaandhayn ku sameeyay Gollahiisa Xukuumadiisa ee sanad iyo saddex bilood jirsatay.

Madaxweyne Faroole waxaa uu magacaabay 6 Wasiir, Hal wasiir Dowle iyo 12 Wasiir k/xigeeno, kuwaasoo isugu jira Wasiiro Cusub, Wasiir K/xigeeno Jagadoodu loo kala bedelay iyo Wasiiro K/xigeeno Cusub.


Wasiirada Cusub ee lagu soo daray Gollaha Xukuumada Puntland waxaa ka mid ah Siciid Maxamed Raage oo Loo dhiibay Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda. EEG Bogga 3aad



GUDAHA



Guddoomiyaha Gobolka Bari Oo Bosaso Lagu Soo dhaweeyay..B 2AAD



Hambalyo Xubnaha cusub ee Maamulka Bari (Siyaasi Muuse Xaaji Abees) P8

Aragtiyaha Kala Duwan Ee Laga Bixiyay Isku shaandhaynta iyo Isbedelada Lagu Sameeyay Gollaha Xukuumada Puntland



Xarunta Ganacsiga Puntland ee Bosaso

Isku shaandhaynta iyo Isbedelka Madaxweyne Faroole uu Toddobaadkan ku sameeyay Xukuumadiisa ayaad moodaa in si isu dhow amaba isku mid ah looga arkay dhinacyo badan oo awal hore shaki ka qabay in isbedel Noocan oo kale ah uu imaan karo.

Eng Maxamuud Maxamed Xuseen Waa Aqoonyahan, hore uga soo shaqayn jiray Hay'adda Wadooyinka ee NESHA. Eeg B 2aad

Ma loo baahnaa isbedel lagu sameeyo Maamulka Gobolka Bari? EEG B 4aad



MA SAXBAA U DABBAALDEGGA DHALASHADII NABIIGA SALLALAAHU CALAYHI WASALLAM? P 8



Beeldaajaha Cal Bari oo La Cal-eemo Saaray

VACANCY ANNOUNCEMENT

JAGO KA BANNAAN HAY'ADA UNICEF.....P5



Aragtiyaha Kala Duwan Ee Laga Bixiyay Isku shaandhaynta iyo Isbedlada Lagu Sameeyay Xukuumada Puntland

Wariyaasha /Ilays



Bosaso:-Caasimada Ganacsiga ee Puntland

Isku shaandhaynta iyo Isbedelka Madaxweyne Faroole uu Toddobaadkan ku sameeyay Xukuumadiisa ayaad moodaa in si isu dhow amaba isku mid ah looga arkay dhinacyo badan oo awal hore shaki ka qabay in isbedel Noocan oo kale ah uu imaan karo

Eng Maxamuud Maxamed Xuseen Waa Aqoonyahan, hore uga soo shaqayn jiray Hay'adda Wadooyinka ee NESHA, haddana ku nool Magaalada Bosaso, Waxaa uu ka hadlay dareenkiisa Isbedelka lagu sameeyay Gollaha Wasiiradda Xukuumadda Puntland " isbedel waa loo baahnaa, waxqabad baa dadku u baahan yahay, Madaxweyne Faroole waxaa loo doortay waxay ahayd isbedelkaas ayuu ku salaysnaa, Madaxweyne waa joogay, kii horayba waa la doortay, Isbedlkuna waa kii uu Madaxweyne ku noqday, Waxaan leeyahay Madaxweynuhu waa inuu ku darraa, dowladu Wasiiro keliya ma aha, Dowladu waa xafiisyada, Agaasimayaasha, Maamulayaasha, Guddoomiyayaasha Goboladda, Taliyayaasha Ciidanka Booliska, Daraawiishta, waa in uu ula sii dhowaadaa, isbedkani sidii u bilaabmay waa in uu ahaadaa, Waa in lala xisaabtamaa Masuuliyiinta. Oo qofkii dambi leh Maxkamad la soo tagaa. Gaar ahaan, Waxaan madaxweynaha u soo jeedinayaa Ciidanka Amniga iyo nabadgelyadu waa waxa uu dalka ku taagan yahay, Waa in aad wax ka qabataa Nabadgelyada"

Axmed Yaasiin oo ah nin Xirfadle ah oo iskiis u shaqaysta ayaa isna cabiray Dareenkiisa iskushaandhayntii Gollaha Wasiiradda, waxaana uu yiri "Isbedelka iyo isku-Shaandhayntan Gollaha Dowladda waa soo dhawaynayaa, waxay ila tahay Anniga in Madaxweynaha Waqti hore ahayd in uu sameeyo, oo Wasiirada Karti-darada iyo Maamulxumada lagu dhaliilayay shaqada ka eryo, Waxaan u soo jeedinayaa madaxweynaha in Xooga la saaro sidii Ammaanka dalka loo sugu lahaa, kadibna loo tafaxayto dhismaha Kaabayaasha Dhaqaalaha, sida Wadooyinka, Dekeda Bosaso, Garoomada Bosaso, Garowe iyo Galkacayo , Waxaan leeyahay Madaxweynaha Dadkaagu Maalin iyo Habeenba way ku garab taagan yihiine, hore u soco.... Soco...soco"

Marwo Sacdiyo oo ka mid ah Haweenka ka ganacsada Dharka iyo Udu-ga ayaa iyana tiri" Horta dadku Maxay Masuuliyiinta ula yaabaan, Waa Xukuumaddee tan ka tayo iyo Maamul wanaagsan oo ay sugaan mar kasta, Dadku Aqoonta iyo Waaya Aragnimada Qofka laga dhigay Wasiirka ma eegaane, Waxay orranayaan Qabiilkee ayuu wasiirkaasi ka soo jeedaa, Reer hebel Waxaa la siiyay Wasaarad Fiican, Reer hebel w/xigeen baa la siiyay, Beel hebla waa laga tegay iyo wixii soomaali meeshaas maanta dhigay, Waxay ila tahay Anniga aynu ku qiimayno Dowladda hadba waxa ay dalka iyo dadka u qabtaan.

Haddaba sidaas iyo si la mid ah ayaa Bulshada Reer puntland Maanta (shalay) u hadal hayeen Isku-shaandhaynta iyo Isbedelka lagu sameeyay Gollaha Wasiiradda Puntland. Waxayna dadku iswaydiinayaan Madaxweyne Faroole ma sii wadayaa isbedelada lagu samaynayo dhammaan Waaxyaha Dowladda Puntland, si loo helo Masuuliyiin ka soo bixi kara Waajibaadka loo igmaday, isla markaana hannan kara indhaha iyo quluubta dadka ay u adeegayaan.

WARARKII TODDOBAADKA

Faroole Oo La Kulmay Wafti Ka Socday Dalka Kuwaite

Madaxweynaha Dowladda Puntland ayaa la kulmay wafti ka socday dalka Kuwait oo ka koobna 12- xubnood.

Waftigan oo isugu jiray dhakhaatiir iyo Ganacsato ayaa Madaxweyne Faroole iyo Xukuukmaduba

si weyn u soo dhaweeyeen.

Md Faroole ayaa u sheegay waftiga in dhulka Puntland uu ku haboon yahay Maalgashi, islamarkaana dhul dihin, isagoo u soo jeediyay in dowladiisu soo dhawaynayso haddii



Doonayaan in ay Maalgashtaan.

Waftigan waxay sidoo kale booqdeen Dekeda, Maxjarka iyo Goobo kale.

Guddoomiyaha Cusub ee Gobolka Bari Oo La Soo Dhaweeyay

Guddoomiyaha Cusub ee Gobolka Bari Md C/xaafid Cali Yuusuf ayaa Toddobaadkan si weyn loogu soo dhaweeyay Magaalada Bosaso.

Masuuliyiin, Nabaadoon, Waxgarada, Haween iyo shacab ayaa kaga hortegay

Afaafka hore ee Bosaso, kuwaasoo watey Caleemo qoyan.

Masuuliyiinta soo dhawaysay waxaa ka mid ahaa Guddoomiyah Rugta Ganacsiga Puntland. Maxamuud Xayir iyo Masuuliyiin kale.

md C/xaafid oo Todd-



la Magacaabay ayaa uga mahadceliyay dadweynaha soo dhawaynta diiran, wuxuna ballan qaaday in uu wax qaban doono.

Beelaaajaha Cal Bari oo La Caleemo Saaray

Talaado 02,2010/WWW

Beelaaaje Ismaaciil Beelaaaje Yaasin Beelaaaje Cali Ayaa toddobaakan loo caleemo saaray Beelaaajaha Cal Bari.

Xaflad Ballaaran oo ka dhacday Magaalada Qadiimiga ah Caluula ee Gobolka Bari ayaa waxaa ka soo qaybgalayn, Madaxweynihii Hore ee Puntland Gen Cadde Muuse, Masuuliyiin ka tirsan Puntland, oo ka mid yahay Guddoomiye K/xigeenka Barlamaanka Puntland, Salaad Xareed , Culimo isimo, Ganacsato , haween, dhalinyaro iyo Dadweyne Farbadan.

Khudbado dhaxalgal ah ayaa laga jeediyay madashii Beelaaajaha lagu caleemo saaray, iyadoo Ra'isul Wasaaraha Dowladda Somaliyeed, madaxweynaha Puntland Md, C/raxmaan Faroole iyo Madaxweynihii hore ee Somalia ay khadka telefoonka kaga qaybqaateen Munasabad.

Ugu Horrarn waxaa Madasha oo si weyn loo qurxiyay ka hadlay Burhaan boqor oo wakiil ka ahaa boqor Claahi Boqor muuse, isagoo Xasusiya Beelaaahaga dhalinyarada ah in xil wayn loo dhiibay,



loogana baahan yahay in xilkaag guto, loona baahan yahay in uu ummada uu beelaaajaha u yahay u shaqeeyo.

Madasha waxaa sidoo kale ka hadlay C/laahi Yuusuf, Gen Cadde Muuse oo isagu goob joog ka ahaa Caleemsaarka Beelaaajaha, iyadoo Masuuliyiintii ka qayb gashay ay Beelaaaje Ismaaciil u rajayyeen Guul.

Gen Cali Samatar Oo Beeniyay Eedaymaha Loo Haysto

Talaado 02,2010/WWW

Madaxweyne ku xigeenkii 1-aad ee Dowladdii Milateriga Gen. Max'ed Cali Samatar oo 74-jir ah oo ku sugan dalka Mareykanka ayaa lagu wadaa in Maxkamad la soo taago xasuuqii uu ka gaystay somalia uu ka tirsanaa dowladii Milateriga.

"Dacwooyinka la

ii haysto waa kuwo been ah oo la dhoodhoobay" ayuu Gen. Max'ed Cali Samatar u sheegay Maxkamadda, isagoo intaas ku daray inuu ahaa mas'uul Qaran wax dhibna uusan dadkiisa u geysan.

isagoo sii wata hadalkiisa waxaa uu yiri

Waan badbaadinayay dadkeyga run ahaantii anigoo adeegsanaya cadaaladda, mar walba waxaan tixgelinayay sharciga dalka, anigu qof ma dhibaateyn, sidoo kalena qof aan cunay ma jiro". ayuu yiri Gen. Samatar.

Dacwo soo oogayasha ayaa ku doodaya in Samatar shakhsiyayn uga masuul ahaa Xasuuq iyo dilal dhacay dabayaaqadii 90

Madaxweyne Faroole Oo Isku Shaandhayn iyo Isbedel Ku Sameeyay Gollahiisii Wasiirrada, Wasiiro Cusubna Magacaabay

Wariyayaasha/Ilays

Madaxweynaha Dowladda Puntland Md C/raxmaan Maxamed Maxamuud (Faroole) ayaa Habeenkii Isniintii, 01,02,2010 isku shaandhayn ku sameeyay Gollahiisa Xukuumadiisa ee sanad iyo saddex bilood jirsatay.

Madaxweyne Faroole waxaa uu magacaabay 6 Wasiir, Hal wasiir Dowle iyo 12 Wasiir k/xigeeno, kuwaasoo isugu jira Wasiiro Cusub, Wasiir K/xigeeno Jagadoodu loo kala bedelay iyo Wasiiro K/xigeeno Cusub.

Wasiirada Cusub ee lagu soo daray Gollaha Xukuumada Puntland waxaa ka mid ah Siciid Maxamed Raage oo Loo dhiibay Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda, isagoo Sanadihii 2005 ilaa 2008 isla Wasaaradaas Wasiir ka soo noqday Xiligii Maamulkii Cadde Muuse.

Wasiirka Wasaaradda Amniga Puntland ayaa loo magacaabay Gen, Yuusuf Axmed Khey. Wasaaradaha Ganacsiga, Caafimaadka iyo Xiriirka Caalamiga iyo Qorshaynta ayaa sidoo kale loo magacaabay Wasiiro Cusub.

Haddaba wargayska Ilays ayaa helay Nuqul ka mid Wareegtadii lagu Magacaabay Wasiirada iyo W/xigeenada, waxayna u qornayd sidatan:-

Xeer Madaxweyne Lr 19 011/03/2010 kuna sabsan Isku shandaynta Golaha Xukuumadda Puntland

Marku arkay Dastuurka Dowladda Puntland

Marku la tashaday Madaxweyne Kuxigeenka Puntland

Marku garwaaqsaday Baahida loo qabo Isbedel lagu sameeyo Xukuumadda Dowladda Puntland

Waxaa uu xeeriyey magacaabida iyo isku shaandhaynta Golaha wasiiradda Puntland;

Gen Yuusuf Axmed Khey
Wasiirka Wasaarada Amniga & DDR

Cali Yuusuf Cali Xoosh
Wasiirka xigeen Aminga iyo DDR

Dr.Wasir Qorsheynta iyo xiriirka Caalamiga
Dr Daa'uud Maxamed Cumar

Pro Cabdulqaadir Cabdi Xaashi
Wasiiru dowlaha Qorsheynta & Xiriirka Caalamiga ah

Eng Cabdirisaaq Yuusuf Cilmi
Wasiirku xigeenka Wasaarada Qorsheynta Xiriirka Caalamiga

Wasiirka Dakadaha iyo Gadiidka Badda
Siciid Maxamed Raage

Wasiir Ganacsiga iyo Warshadaha
Xasan Faarax Jaamac

Cabdi Maxamuud Maxamed
Wasiirku xigeenka ganacsiga

Dr Cali C.laahi Warsame
Wasaarada Caafimaadka

C.khaliif Xaaji Xasan Aw axmed
Wasiirka Cadaadalada iyo Dhaqan celinta

Cabdi Yaasiin Xirsi
Wasiir ku xigeenka ka Arimaha Gudaha iyo Dowladaha Hoose

Crisaaq Maxamed Ismaaciil
Wasiirku Xigeenka Arimaha Gudaha iyo dowladaha hoose

Cabdi Shakuur Mire Aadan
Wasiirka Xigeen W/Howlaha Guud iyo Gadiid

Cabdulqaadir Muuse Yuusuf
Wasiirku xigeenka Wasaarada Kaluumeysiga

Maxamed Cabdulaahi Saalax Deer
Wasiirku xigeenka wasaarada kaluumeysiga

Saynab Ugaas Yaasiin
Wasiirka ku xigeenka W/ Haweenka Qoys

Cali Axmed Gamuute
Wasiir ku xigeenka Waxbarashada

Cabdiqani Salaad Yuusuf
Wasiir ku xigeenka Warfaafinta

Maxamuud Maxamed Sheekh Ibraahim
Wasiirku xigeenka Wasaarada beeraha iyo waraabka

Wasiirada Waayey Xilalkoodii

Sida lagu xusay Wareegtadii ka soo baxday Xafiiska Madaxweynaha waxaa xilalkoodu waayay Wasiiradda kala C/laahi Siciid Samatar oo ahaa Wasiirkii Amniga Puntland ilaa 2007.

C/risaaq Yaasiin Abdule Geesood oo ahaa Wasiirkii Diinta iyo Cadaalada, ayaa laga qaaday Jagadaas, isagoo Jagadaas hayay Muddo dhor sannadood ah, kana mid ahaa Wasiiradii laga soo xushay Maamulkii Cadde Muuse.

Waxaa sidoo kale Jagadoodii waayay Dr bashiir Cali Biixi oo ahaa Wasiirka Caafimaadka Puntland, isagoo lagu tilmaami jiray Wasiirada ugu dhow Madaxweynaha Puntland.

Isku shaandhayntan waxaa sidoo kale ku waayay Jagooyinkoodii Wasiirada kala ah, C/laahi Cali Xirsi oo ahaa Wasiirkii Ganacsiga Puntland, Faarax Aadan dhalac oo ahaa wasiirkii Qorshaynta iyo Xiriirka Caalamiga, C/risaaq Xuseen Gaceyte oo ka odoyayn jiray Wasaaradaha dekedaha iyo Gaadiidka badda iyo Xaliimo Maxamud Maxamed oo ahayd Wasiir K/xigeenadda Arrimaha Haweenka Puntland.



Qaar ka Tirsan wasiiradii dhowaanta La magacaabay oo sugan Madaxtooyada

Wasiiro k/xigeenadda Cusub ee ku soo biiray gollaha Xukuumada Puntland waxaa ka mid ah Crisaaq Maxamed Ismaaciil oo loo magacaabay Wasiirku Xigeenka Arimaha Gudaha iyo dowladaha hoose.

Md C/risaaq Waxaa uu ahaa Duqii degmada Bosaso, oo dhowaan isaga iyo Golihii Deggaanka ee Degmadda, Madaxweyne Faroole kala diray.

Cabdiqani Salaad Yuusuf iyo Maxamed Cabdulaahi Saalax Deer ayaa ka mid ah Wajiyada ku cusub Dowlada Puntland, waxaana loo kala magacaabay Wasiir ku xigeenka wasaaradda Warfaafinta iyo Wasiirku xigeenka wasaarada kaluumeysiga.

Wasiiro K/xigeenadda loo wareejiyay Wasaaradda kale waxaa ka mid ah C/shakuur Mire Aadaan oo ahaa Wasiir K/xigeenkii 1aad ee Wasaaradda Warfaafinta. Hidaha iyo dhaqanka, Waxaana loo magacaabay Wasaaradda Howlaha Guud iyo Guriyaynta, sidoo Col, Cabdi Yaasin Xirsi ayaa loo wareejiyay Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Dowladaha Hoose, isagoo hore u ahaa wasiir ku/xigeenka Wasaaradda arrimaha Amniga.

Arrintu siday doonto ha ahaatee, tirada Guud ee Gollaha Wasiiradu waa 52 wasiir, kuwaas oo isugu jira 18 wasiir, 4 wasiiro dawle iyo 30 wasiir kuxigeeno.

isku shaandhaynta iyo isbedelka lagu sameeyay Gollaha wasiiradda Dowladda Puntland ayaa waxaa soo baxaya dareeno Farxad leh oo lagu soo dhawaynayo, inkastoo Dadweynaha Qaarkood ay sheegeen in Madaxweyne Faroole looga fadhiyo in uu isbedel ku sameeyo Agaasimayaasha Wasaaradaha Qaarkood oo lagu tilmaamo in ay yihiin Tamar-darro iyo Maamul-xumo

Barnaamij Wacyi Gelin

Waxaa dadweynaha la ogeysiinayaa iney kala socdaan qoraalo taxane ah oo ku soo bixi doono wargeyska todo-baadyada soo socda . Sidoo kale, la socdaan barnaamijyadan idaacadaha iyo dhamaan telefiishanada Puntland

United Nations Joint Program for Local Governance and Decentralized Service Delivery

Barnaamijka Horumarinta Maamul Wanaagga iyo Adeegyada Bulshada

Mashruucan oo marka la soo gaabiyo loo yaqaano JPLG, waa hawl si wadajir ah isaga kaashadeen dhowr hayadood oo ka mid ah Qaramada Midoobey sida

ILO, UNDP, UN-Habitat iyo UNICEF.

Waa barnaamij loogu tala galay inuu la jaan qaado hawl-galka dib u dhiska iyo horumarinta Soomaaliya sanadada 2008 ilaa 2010.

Hadafka la doonayo in lagu gaaro waa in si baaxad weyn loo soo celiyo in dawladda hoose noqoto fuliyaha adeegga bulshada oo qiimo leh.

Sidoo kale in lagu xoojiyo wacyi gelinta madaniga ah iyo ka qeyb galka tallo wadaagga.

Ujeedooyinka Guud ee mashruucan:

- In Dawladda Hoose ka qeyb qaadata horumarinta nabadda iyo in adeegyada bulshada u bixiso si cadaalad ku saleysan meelaha si gaarka ugu baahan.

Ujeedada Gaarka ah

- In Bulshada ka helaan Dawladda Hoose adeegyada bulshada sida biyaha, caafimaadka iyo nadaafadda.
- In Dawladda Hoose ay masuul tahay oo lala xisaabtami karo una qabato hawsha si waadax ah oo la gran karo.

Gebi ahaan mashruucan wuxuu diiradda saarayaa dawladda dadka tabarta yar, xuquuqul insaanka, maamul wanaagga iyo xeerarka la xisaabtanka, masuuliyadda iyo ka qeyb galka bulshada ee talo wadaagga.

Labada ujeedo waxay si u kala qeexaysaa adeeg bixinta iyo adeeg codsi. Adeeg bixinta waa gudbinta adeegyada ee Dawladda Hoose u fudiso bulshada. Adeeg codsiga waa in bulshada ka codsadaan dawladda adeeg hufan oo waadax ah iyo maamulka sanduuqa dhaqaale ee Dawladda hoose.

Fulinta Mashruucan waxaa ku mideysan Maamulka Dawladda Puntland, Maamulka Gobolka, iyo degmooyinka, kaasoo lagu doortey doorasho xalaal ah. Sidoo kale waxaa ka mid ah cid waliba oo ay khuseysa ee ka tirsan bulshada.

SDT Wasaarada Arrimaha Gudaha JPLG

Ma loo baahnaa isbedel lagu sameeyo Maamulka Gobolka Bari?

WIQ; CUMAR SIIII MAXAMED

Waxaa aad loo hadal hayey beriyihii dambe inuu jiri karo isbedel lagu samaynayo Maamulka Gobolka Bari, intaas waxaa dheeraa doodaha sida weyn looga doodayo amniga iyo waxy-aabaha ku soo kordhay Boosaaso oo xarun u ah Gobolka Bari.

Wareegtaddii ka soo baxday Xafiiska Madaxweynaha 25 Feb 2010 ee ku saabsanayd kala diridii Golaha Degaanka iyo xil ka qaadistii Gudoomiyihii Gobolka Bari iyo Duqa Boosaaso, ayaa waxay dadweynaha degaanku u arkayeen talaabo mudnayd inuu Madaxweyne C/raxmaan Max'ed Faroole qaado si loo dardar geliyo adkaynta nabad gelyada iyo in meesha laga saaro habacsanaantii jirtay ee ay shacabku ka hadlayeen.

Ma sahlana qofka loo dhiibo xil cayn kaas oo kale ah. Gobolka Bari iyo Degmada Boosaaso, waqtiga adag waxaa uu u baahan yahay nin adag oo isku wadi kara bulshada noocyadeeda kala duwan, C/xaafid Cali Yuusuf iyo Max'ud Faarax Beeldaaje waxay shacabku qabaan inay dhinacyo badan wax ka qaban karaan, waxay abuuri karaan kalsoonida dadka oo soo noqota, hase ahaatee waxay wax walba ku xirnaan doonaan sida maamulka gobolka iyo degmadu ula shaqeeyaan iyo in awoodda dawladda Puntland yeelato kala sarayn iyo kala am-arqaadasho.

Tan iyo magacaabistii xubnahan cusub waxaa isa soo tarayey soo dhoweyntooda iyagoo looga fadhiyo inay dhinacyo badan wax ka qabtaan, waxay indhah shacabku eegayaan sida dhinaca Cadaaladda mamulkani wax uga qabandoona iyadoo la raacayo waddad Sharciga ah ee qof walba inuu Sharcigu ka sareeyo, iyadoon lagu xad gudbayn qofka lana daafacayn dembiilaha.

Ugu dambayntii ayaa rajadda dadku waxay u muuqataa mid ka soo baxaysa quus una siinqaysa dhinaca kalsoonida iyo in Sharcigu noqdo midka kala haggada dadka ee loo siman yahay iyo doon si gaar



ah qofna farta loogu fiiqayn. Dadweynuhu waxay is weydiinayaan masuuliyiintan la magacaabay fursad ma u heli doonaan inay la xisaabtamaan madaxda gobolka ee iyaga hoos tmaadaa.

Marka si weyn loo eego Degmada Boosaaso ayaa waxay u baahan tahay wax ka qabad aad u balaaran, dhinac bilicda iyo Wadooyinka, waxaa xarunta degmada buux dhaafshay shaqaale aan waxtar badan lahayn oo curyaamiyey howlqabadii maamulka degmada, Agaasimayaal mudo dheer joogay oo jalaafeeya Duq walba oo loo soo magacaabo. Runtii waxay Boosaaso u baahan tahay kala hufid dhinacyo badan leh.

Shacabka Boosaaso ee baqdinta iyo kalsooni daridu jaahwareerisay ayaa waxaa iyagana laga doonayaa inay la shaqeeyaan maamulka cusub, gaar ahaan dhalaniyaradda, haweenka iyo cuqaasha iyo waxgaradka oo dhan.

Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa biyo sacabadaadaa looga dherгаа, waxaa looga bixi karo marxalddaha qalafsan ayaa ah iska warhayn iyo wada shaqayn iyo in Shacabka Boosaaso gacmaha is qabsadaan, dhana uga soo wada jeedsadaan adkaynta nabadgelyada iyo horumarinta Boosaaso. Nin Xil Qaaday Eed Qaad.

Sidaas darteed ayaanu shaki ku jirin in Shacabku u baahnaa isbedel Mamaamul ee gobolka Bari

unite for
children



UNICEF SOMALIA

VACANCY ANNOUNCEMENT REF: UNSOM/2010/005

Title :Guard Supervisor
Category and Grade Level :GS-4
Type of Contract :Temporary Appointment
Length Of Contract :11 months
Organization Unit :Operations
Duty Station :Bossaso, Somalia
Date of Issue :1st March 2010
Closing date of Application :15th March 2010

Qualified Somali nationals are invited to apply for the position of Guard Supervisor to be based in Bossaso, Somalia. The successful candidate will be offered Temporary Appointment for 11 months. Further extension will be based on organization needs, funding availability and satisfactory performance

Purpose of the Post:

Under the direct supervision of the UNICEF Field Security Officer (FSO), the Guard Supervisor will assist in the implementation of security operations and all matters relating to the management of safety and security for UN personnel and assets on UNICEF compounds.

Major duties and responsibilities:

1. Supervision of guards in all aspects of daily guard operations, i.e:
 - a Scheduling of guard shifts.
 - b Assist the FSO in the training of guards.
 - c Conducting tests for guards (i.e.observation tests, site knowledge tests, loyalty tests).
 - d Discipline and conduct of guards.
 - e Regularly conduct snap checks to all designated guarding posts and ensure the guards are present, alert and adhering to the Post Standing Orders.
 - f Account for all security equipment allocated to the guarding function.
2. Day to day management of the compound security, i.e.
 - a Monitor and ensure that security SOPs are adhered to.
 - b Maintain and ensure that security records and site registers are properly kept and updated. These include: Visitors Register, Gate Pass Register, Occurrence Register, Incidents records.
 - c Monitor security systems e.g. smoke detectors & alarms and report any malfunctions.
 - d Ensure that fire fighting and prevention SOPs are adhered to.
 - e Check all vehicles, fire extinguishers and all other security items within the compound and hand over the same to the next shift in-charge. This will be done during handing/taking over.
 - f Check and ensure that the perimeter fence has not been tampered with and that all compound gates are securely locked.
3. Responsible for physical security of UNICEF Staff and Property,

including the following:

- a Report all suspicious activities, threat or risk that may cause harm to UN staff and property without delay to the FSO or any senior UN manager,
- b Ensure that goods and property loaded into UNICEF/staff/visitors vehicles are properly declared on entry and exit into/out of the compound,
- c Maintain the Occurrence Register by recording all happenings that occur within the compound. This will include reporting time of guards, discrepancies noticed, i.e. broken lights, windows and fence, suspicious persons, arrival/departure time of staff transport buses.
- d Ascertain that all gate passes have been duly authorised as appropriate and have been delivered to the Admin/Transport department for their confirmation with heads of sections.

Qualifications, Experience and competencies

- Completion of secondary education, preferably supplemented by studies in Social Sciences or related technical field like military or police academy.
- Additional security or safety qualifications would be an advantage (for example fire fighting, first aid responder, or signal/radio operator)
- A law enforcement or military background or relevant experience of at least three years.
- Demonstrates integrity by modeling the UN's values and ethical standards. Treats all people fairly without favoritism.
- Displays cultural, gender, religion, race, nationality and age sensitivity and adaptability.
- High level of awareness on security matters & understanding of different levels of risk & threat.
- Willingness and readiness to undergo further training on the job;
- Willing to work long hours, under difficult conditions and often at high levels of stress.
- Good inter-personal and communication skills and the ability to interact readily with both guards and UN staff members at all levels.
- Experience in operating basic security & communications equipment (radios, satellite phones, & alarms);
- Promotes the vision, mission, and strategic goals of the United Nations & UNICEF in particular.
- Fluency in written and spoken English and Somali is essential, including the ability to draft documents in English.

Interested and qualified candidates should send their applications with updated UN Personal History Form (P.11), updated CV, copies of academic certificates to one of the following addresses. UN staff is requested to provide at least two Performance Evaluation Reports (PERs). Please quote the vacancy number in your application.

Human Resources Specialist
 Vacancy Number 2010/005
 UNICEF (USSC)
 Nairobi, Kenya

OR

Chief of Field Office
 Vacancy Number 2010/005
 Bossaso, Puntland

Or email to: somaliahrvacancies@unicef.org

Please note that documents submitted along with your applications will not be returned. Ensure you send copies of your testimonials. Only short-listed applicants will be contacted

**QUALIFIED FEMALE CANDIDATES ARE ESPECIALLY ENCOURAGED TO APPLY
 UNICEF IS A NON-SMOKING ENVIRONMENT**

Q.13aad:

Siraha ku duugan dagaalka Maraykan ee daafaha dunida!

Lid ku ah dhamaan cadowga

W/Q:-Mr Richard A. Clarke

W/Tarjumay C/weli Jaambiir

Guddoomiyihii Hay'adda CIA-da George Tenet, ayaa aaminsanaa inaanu shaki ku jirin in weeraraddaas ay Al-qaacidda fuliyeen, oo ay iyagu galeen cadaawada noocaas oo kale ahayd. Sidaa daraadeed, mar hore ayuu telefoono kula xidhiidhayay dhigiisa dunida dacalladeeda, waxaanu ku dhaqaaqay diyaarinta ciidamadii fulin lahaa weerarada rogaal-celinta ah. Xoghayihii Difaaca Donald Rumsfeld ayaa isna si kooban uga hadlay isticmaalka xoog millatari. Sidaa daraadeed, Ciidamadii Badwaynta Atlaantikada ayaa ka soo kolanyaystay Saldhiga Norfolk, waxaanay isku soo gureen diyaaradaha ciidamada daad-gureeya iyo maraakiibta badda iyagoo ku soo jeeday New York. Xoghayuhu wuxuu meesha ka saaray xaqiiqada ahayd inaanay jirin cid ku amartay in Ciidamada Taliska Atlaantikadu sidaa sameeyaan. Hase ahaatee, waqtiyada sidan oo kale ah, inaad adigu is-dirtaa waxay ahayd wax wanaagsan.

Ilaa 120 diyaaradaha dagaalka (miigga) gaadhayay ayaa kama dambaystii ku wareegayay guud ahaanba hawada caalamiga ah ee Maraykanka. Isla markaana ciidamadii caalamka oo dhan kala joogay ee Maraykanka ahaa waxay wada-qaateen amarka dagaal la bilaabo. Hay'adda FEMA waxay la hadashay Kooxaha Baadigoobka iyo Samato-bixinta si ay u nadiifiyaan habaaskii iyo burburkii Manhattan ka dhacay (Twin Towers). Dhiigii qulqulayay ayaa meel kasta yaalay. Xukunka Degdega ahaa wuxuu saameeyay Gobollada New York, Virginia iyo Degmeda Columbia. Dabadeedna Diyaaradii Madaxweynaha ayaa duushay oo hawada gashay iyadoo ay hareeraha ka socdeen Miigaga F15-ka ahi. Intii uu soo socday diyaarada keliya ee rakaabka qaada oo ku jirtay hawada Ameerika ayay tiisu ahayd. Hawadu nadiif ayay ahayd. Dhanka kale marka la eego, Diyaaradaha Rakaabka Hay'adda Hagista Hawada Maraykanku (FAA) ay dhulka soo fadhiisay maalintaasi waxay gaadhayeen inka badan 4000 oo diyaaradood, waxay leexiyeen duulimaadyada diyaaradihii ka imanayay Yurub, kuwaas oo loo duway garoomo yar-yar oo ku yaalay Kanada, iyadoo ay aad u yaraayeen hadiiba ay jireen wax huteelo la seexo ahaa. Sidaa daraadeed, dadweynaha reer Kanada ayaa guryahoodii u furay dadkii martda ahaa, kuwaasoo ka argagaxsanaa

KA YIMID BOGGA 8AAD

Hambalyo Xubnaha cusub ee Maamulka Bari

Mudane Madaxweyne, aniga oo aragtidayda qof ahaaneed ka hadlaya, waxaan ka digayaa in ay Puntland ka hawlgalaan wax loogu yeero ciidan oo aan u diiwaangashanayn ama ka mid ahayn ciidammada dawladda ee rasmiga ah, sida Daraawishta, Booliiska, Asluubta, Badda iyo Nabad sugidda.

Waxaan filayaa, in ay jiraan maleeshiya Beeleedyo hubaysan oo badan oo loogu yeero ilaalo gaar ahaaneed ama (Special Security) oo la socda Masuuliyiinta Dawladda, kuna dhexjira xayndaabka dawladda.

Inkasta oo ay tahay wax laga xishoodo in Masu'uul u adeegaya dalkiisa ay isaga iyo shacabkiisa cidiba u dhexeyso, ama uu iska ilaaliyo bulshadiisii shalay laga soo dhex qabtay, si uu xil ku meelgaar ah ugu qabato, berrina dib ugu noqonayo kolkuu waajibkiisa gudato, haddana haddiiba aan ilaaladaas laga maarmi karin waxaa ila habboon:

1. In ilaaladaas ciidammada lagu kordhiyo, loona diro tababar ciidan, lagana qaato ciidammada rasmiga ah ilaalada gaar ahaaneed intooda lagama maarmaanka ah, ayna ku shaqeeyaan dhar cad oo caadi ah iyo hub dahsoon.

WABBILLAHI TAWFIIQ

Qore: Muuse Xaaji Abees

Email: abees11@yahoo.com

wixii iyagu ku dhacay iyo wixii Ameerika ku dhacay, iyagoo yaaban ayaanay wax iska way-diinayeen.

Wax yar ka dib markii uu Madaxweyne Bush ka soo kacay Saldhiga Millatariga Omaha, waxa dumayay dabaqii 7aad ee Taawarkii Xarunta Ganacsiga Adduunka, waxaana dabaqaas qaybtiisa toddobaad ku yaalay xafiiska taliska u ahaa Maayarka Caasimada iyo weliba Xafiiska Hay'ad Sirdoonka Qarsoon ahayd. Hadii aan ku soo noqdo Qolkii Hagista Xaaladda, wuxuu hadalkii isu-rogay waxay noqonayso tal-laabada labaad. "Okey," ayaan ku bilaabay. "Dhamaanteen waynu ognahay in weerarkani ka yimi Al-qaacidda. Balse, Hay'adaha CIA iyo FBI-da ayaa arrinta sii axadhi doona, isla markaana eegi doona inaan saxsanahay iyo inkale. Waxaynu doonaynaa xaqiiqada, laakiin, hadana xilligan xaadirka ah aynu kaba dhigno inay fuliyeen Al-qaacidda. Hadaba maxaa ku xiga?" ayaan hadalkaygii raaciyay. "Eeg," ayuu ku soo jawaabay Rich Armitage, oo intaa ku daray, "Waxaanu Talibaan ugu sheegnay siyaabo aan kala cadayn in hadii ay arrintani dhacday ay markaa iyagu cawaaqibkeeda yeelanayaan. Mana jiraan wax ay immika ku kala duwan yihiin Talibaan iyo Al-qaacidda. Labadooda dhinacba way wada-dhacayaan." Taalibaaniyiintu waxay ahaayeen kooxo mayal-adag oo xilligaa maamulayay Afgaanistaan. "Bal ka waran Bakistaana?" ayaan waydiiyay Mr Armitage.

"Waxaanu u sheegnay inay jidka baneeyaan. Waa inaanu baabi'inaa hoyga gaboodka u ah," ayuu ii raaciyay Mr Rich Armitage oo cadho badani madax-martay. Hase yeeshee, hadii aanu dalka Bakistaan nagala shaqayn arrintaas, waxaanu wajahaynaa mashkilada ugu balaadhan oo nagaga imanaysa waddan islaam ah oo ku hubaysan Quwada Niyuukleerka. "Waxaanu u baahnaa doonaa cadaadisyo madaxweynenimo oo la saaro dalalka Yaman iyo Sucuudiga," ayuu yidhi John McLaughlin, oo ahaa ku-xigeenkii Madaxa CIA-da. "Isla markaana tallaabada ugu balaadhan ee barnaamij qarsoodi ahaan loo fuliyaa qadanaayaa saddex ilaa shan sannadood, kaa-soo lagu kabayo awoodda Jabhadda Xulufada Reer Waqooyiga," ayuu raaciyay hadalkiisa Mr McLaughlin. Taageerada noocaas oo kale ahayd aad bay habsan ugu ahyad Hogaamiyihii Jabhadda Xulufada Waqooyiga Massoud, sababtoo ah xilligan (galabnimadii maalintii qaraxyada 9/11), ka hor 24 saacadood ayaa si qorshaysnayd loo qarariyay. LA SOCO

AYAAN DARAN

W.Q:- Dr:- CABDULAAHI SH. XUSEEN (HANTIWADAAG)

Aagaan wuxuu Asli u sheegay inuusan waxba ka qabin in toddobaad kaddib ay u keento jawaab kama dambeys ah.

Asli habeen kasta iyo maalin walba waxay ka fekeri jirtay sidii ay Aagaan ka yeeli lahayd. Waxay bilowday inay dib u raad raacdo dab-cigiisa, isla markaana qiyaasto oo daristo in Aagaan yahay nin ay mustaqbalkeeda ku aammini karto iyo in kale. Asli waxay soo xusuusatay inta Aagaan habeen dhaaxo ah kaga khasaaray gurigeeda, isla markaana aanay moogeyn baarrinimadiisa oo in ku filan ay ka tiqiin.

Asli waxay iskula hadleysay, "Waa yaab! oo muxuu Aagaan haddii uu I jecel yahay intaas oo dhan iigu sheegi waayey" Asli waxay kaloo ka walwal qabtay in Aagaan sidii Xarbi oo kale waalidka xaggiisa dhibaato kaga soo faruuranto.

Aagaan toddobaadkii wuxuu la noqday wax dheer oo aan dhammaaneyn. Waxaana ku beer-may shaki iyo walaac, wuxuu ka cabsi qabey inay Asli "MAYA" ugu jawaabto. Wuxuuna is-lahaa "Haddii Asli ku doonayso maxay toddobaadka kuugu qabatay oo isla markiiba jawaab oggolaansho ah kuu siin weyday, midda kale. Nin Asli u cusub oo ay hadda baranayso ma tahay"

Asli intii go aanka aanay qaadan waxay la tashatay faadumo, jawaahir iyo walaalkeed cali ammuur oo dhammaantood Aagaan yiqiin waxayna Asli u sheegeen in aanay waxba ka qabin. Taddobaadkii waa dhammaaday Aslina waxay ugu bishaareysay Aagaan in talo ugasoo dhammaatay inay yeesho codsigiisii. Aagaanna aad buu ugu fatxay jawaabtii Asli uguna riyaayay.

Canab oo hooyadeed ay isku xumaadeen, ciddii waa ka guurtay, Asli waano waa kala daashay, Asli ma aanay jecleysan waxa ay canab ku kacayso. Inkastoo ay Asli ugu sheekaysay in aanay dib dambe ugu noqon doonin wax mustaqbalkeeda u daran, waysa dhaafi wayday

Asli waxay la ahayd in dhabtii soo gaartay canab waayo aragnimo iyo tusaale ay ugu filan tahay. Wax xaaladdu soo socotaba Asli galab jimce ah bay si kedis ah u timid si ay uga qaadatao guriga canab alaab ay iska leedahay, waxayse la kulantay wax aanay fileyn. Markay gurigii gashay waxay aragtay canab oo bartamaha u fadhida goob rag iyo dumarba isku dhafan yihiin oo lagu qayilayo. Intay naxday bay dib durbadiiba u noqotay waana iska ilowday alaabtii ay soo raadsatay. Canab qudheedu ma filleyn booqashada kediska ah ee Asli: si aadana way uga naxday. Waayo canab waxay Asli ka ballan qaaday inay noqonayso gabar dhowrsan oo nafteeda ka adkaata. Canab markiiba way ka soo daba baxday. Waxayse aragtay Asli oo laba surin dhexdooda ka laabatay oo libirtay. Canab waa garatay in saaxiibteed ka duddey, waxayna goosatay in intay guriga ugu tagto soo maslaxayso.

Asli markay gurigeedii ku soo noqotay waxay go aan ku gaartay inay canab u jarto xiriirka ay la leedahay, waxaana maskaxdeeda ku soo dhacday:

<<Alla canab khaa'insanaa oo haddii aanay ilaahii abuuray ka cabsanayn maxay aniga beenta iiga sasabanaysaa oo ii tiri waan toobad keenay. Alleylehe waa qof caqli xun oo wixii u san iyo wixii u daran aan kala aqoon>>.

Habeennimadii baa Canab ugu timid Asli gurigeedii, waxayna ku tiri: LA SOCO

WADAR SOOMAALIYEED

Ereyadii:- Ibrahim Cajaa'ib

GOROD :

Amankaag iyo yaab
Dad ibliisku Habowshey
aan istaakh. furanleysanoo
Eebahayna xasuusan
Isku diraaaye shisheeye
Iyaguun is dilaaya
Aan eegaynin dantooda
Sidee bow aragtaan?

GUULEED :

Amin horaa la ogaadayo
Soomaali waa isla weyn.
Isla fiican doqneed
Hadii aad arrintooda
Abaartoo runka sheegto
Islaanimoo waa ku tilmaamane
Kuma aadana diinta
Siduu Eebahay sheegay

GUBADLE :

Aragoodu mid weeye
Afna waysku midkaa
Hadii diinta la eegana
Gabi goodba islaan baa
Uumiyuhu u yaqaan
Waxse aad ula yaab ah
Aqoontooda luntay
Aabeyn tooda dagalkiyo
Ololaynta Qabiilka
Sida ay ushidaan

GUUTAAL :

Inan ragoow la oga
Inaadan Aayo lahaynoo
Asaagiin ka hadheenoo
Arintiin noqotay
Ololaynta dagaalka
Iyo ubadkoo la dilaayo
Isku duulka colaada
Uumiyuhu nala yaabye
Isku sheexa dhamaan

GEELE : Isweydiiya Dadoow

Yaa aduunku la yaabey
Aqoontooda yasaan
Aadanaha Tiro-raac
Mid ahaan insiga
Is rogaal garaadkoodu
Ugaadh Duurka xulaysiyo
U ekaaday dugaag
Irkigoo aan ka sheexin
Waxay aabi faleen
Aan soomaali ahayn

GEESOOD : Waxba yaan urugo

Amintii Tagtay falo
Us ka geeda labaarin
Aan ideen tashanoo
Aayahiisa Dalkeena
Aqoon sigiisku raacnoo
Aan ilowno Qabiilkoo
Cudurkaa Ubadkeeniyo
Inama deenii dhameeyay

GUUTAAL :

Hadii aan geyigeena
Dhamaan loo gurmanaynin
Gaf wixii la falay
Gar daradii Doqoniino
Ka waan toobi garaad
Gocasho la iska ilaawin
Shangeeslaha la xasuusan
Waxa ay gudi doonto
Ama ay gali doonto
Gobonimooy la tilmaamin
Qaran loo guntaneyn
Walee guul fili maayo

GURXAN :

Guutaalow hadal kaagu
Waa ma guuraan la xusuusto
Geel jirese waa u ciyaar
Gurmood uu ku hadaaqo
Iyagaa wax Gorfeeyoo
Garaad koodu kolkiiba
Fiiro Dheer ku ganaaya
Yaa abwaano u geeya

GUUTAAL :

Waxaa uurku tabaayo
Hadii aan af ka sheego
Runtana aad u abaaro
Soomaalooy idilkiinba
Aduunka waad ka hadheenoo
Ugaar baad noqoteen
Awarta daqda dhirteena
Iyo idinkeys ku midoo
Astaantaa waxa keenay
La aasaanka Qabiilka

GURXAN :

Eebahay kuma qaado
oraahdaada cadceediyo
Ileys baad ka dhigtay
Aduun beyga Horeeyaye
Ana wan tabayey
Waa irbaad xun Qabiiloo
Waa midkii arligeena
Maatadiisii idleeyay
Ubad keynu IHyn iyo
Aaran kiisii laayey
Eedaadnoo aragnee
Ma hadaan wax ogaaney

GUBADLE :

Guyaal baynu Aduunka
Dadnimo aynu ka guuray
Guudka wawga eknee
Garaadkaa Bahaloobey
Gabi ahaan shanta qaar
Uumiyaa guriyeysta
Gedi weynala yaabey
Geda aan ku sugneyn
Hadiise aad garateen
Wuxuu gaystay Qabiil
Guule waa mahadiise
Gacmaha aan isa saarno

GAAS :

Garatay oo hadalkaagu
Waa ma dhaafaan la gunto
Goobta aynu ka qaadno
Gobolaysi aan dhaafno
Gabiigeen mid ahaano
Qaran aynu u guuro
Gurigii ha ba'ee
Gayiguu baa bi iyee
Qabiilna gawrac ku taagno
Aynu gurmoodka aqoonta
Gidigeen uda daalno
Gabiigiisba dalkeena
Si uu uunka ugaaro

GUUTAAL :

Soomaalooy arintaadu
U Eekaatay sidii
Ninkii ayrada geela
Abaaraa la maraayay
In badana diiftu kuraagtay
Kolkuu arli doogleh
Iyo ilo roobleh dhex keenay
Irmaan kiisii dhalay
Iba gooyay dhamaan
Ubadkiisu qadoodi
Aamus miyey ku dhargaan

GURXAN :

Afku waa hadlayaaye
Adeeg maad talisaan
Rag iintiina aqoonleh
Iyo odayaasha wacdaan
Ilowtaan shalayto
Xumahaad arag teen
Amakaag iyo yaab
Aduunkaydin dayaayee
isku sheexa dhamaanoo
Danihiina abya
U adeega samaantoo
Aayihiina garta

GEELE :

Gole hadii la habeeyay
Guurtidiina la keenay
Gabi ahan aqoon yahan
Iyo garcastiiba fadhido
gedina maanta la joogo
Guyaalna waayo arkaan
Sida aan garanaayo
Gartu waa isma seegto
Garsoorna waa u cadaan
Waxay guushu ahaan
Xumahoo galbadiyo
Gocashadoo la ilaawo

GEESOOD :

Garatayoo ma habaabin
Sidaan goob ka filaayana
Guuli wey dhalane
Goboleysi tilmaaniyo
Kala guurna la'aas
Gudubnay oo nabadeyn baa
Gayigii ka sinaatay
Soomaali ways garatay
Inay habowday guyaal
Gabi ahaanba aduunka
Gaabisoo ka hadhay
Hadase ways garatay

GUUTAAL :

Arin taagan amin hore
Hadaan aad u xusuustay
Urugaa laygu talaaloo
Biyahoon afka saariyo
Oontii baan cuni waayey
Ula jeedana waa
Waxa uurku tabayay
Aadaal maanka gashay
Awoowyaalo dadkeenii
Aan aqoonta lahaynoo
Arligeena ka cayrshay
Gumeystihii is bidaayey

GOROD :

Guutaalow arintaa
Asaraar kama joogo
Axmed baa u horeeyay
Ku Eedaadshay Gumayste
Hadii aan run abaarana
Darwiishkii ma ilaawin
Ula maanka libaax
Soomaalooy idilba
Wuu ogaadey aduunku
Sooyaalka amin dheer
Amakaagshay Galbeed
Utaal ay ku qoreen,

Mashruuca Dib-u-kicinta Bulshada

Mashruuca Dib-u-kicinta Bulshada (Social Rehabilitation Project), waxaa uu ka mid ahaa mashaaricdii dhaxal galka ahaa ee sanadkii hore laga fuliyay Puntland. Mashruucan waxaa iska kaashaday Hay'adda Norwegian Church Aid (NCA) oo fanka bixinaysay, iyo NGO-ga Maxalliga ah ee Somali Relief and Development Organization (SORDO) oo fulinaysay mashruuca. Mashruucu wuxuu ka koobnaa qaybo kala duwan oo ay ka mid yihiin dhaqaale abuur loo samaynayey haweenka faqiirka ah ama tabarta daran, qalab waxbarasho oo lagu taageerayey xarumo waxbarasho oo haweenka ka faa'iidaystaa, iyo qaybta ugu muhiimsan oo ah wacyi-gelin iyo tababaro loo qaybtay culumaaudiinka si ay uga wacyi-galiyaan bulshada dhibaatooyinka burcad-badeednimada iyo bulshada sidii ay ula dagaalami lahayd dhaqamada xunxun ee burcadnimada.

Intii uu Socday Mashruucan, waxaa siminaaro iyo tababaro kala duwan lagu qaybtay degmooyinka Garoowe, Dangoroyo iyo Eyl. Waxaa kaloo barbar socday ololeyaal ay hormuud ka yihiin culimaddu oo laga soo horjeeday burcadnimada.

Waxaa ka mid ahaa fariimihii ama halkudhegyadii la adeegsanayey kuwan soo socda:

1. Islaamku ma ogola burcadnimada
2. Ha u ogolaanina ilmihii inay ku biraan Burcad-badeeda
3. Burcadnimadu waxay lid ku tahay Diinteena iyo Dhaqankeena
4. Burcad-badeednimadu waxay burburi-naysaa hab-dhaqanka bulshadeena
5. Burcad-badeednimadu waxay lid ku tahay horumarka wadankeena



NORWEGIAN CHURCH AID

NCA Somalia Puntland Office, Garowe
E-mail: ncapuntland@gmail.com
Tel: +252 5 844447



SORDO


SOMALI RELIEF & DEVELOPMENT ORGANIZATION (SORDO)
HQ: Garowe, Puntland, Somalia
Tel: +2525845637

Hambalyo Xubnaha cusub ee Maamulka Bari

(Siyaasi Muuse Xaaji Abees)

“MADAXWEYNE FAROOLE WAA ASIIBAY XUBNAHA CUSUB EE UU U KALA MAGACAABAY MAAMULKA GOBOLKA BARI, DEGmada BOOSAASO IYO SIDOO KALE GAALKACAYO OO KA HORRAYSAY”
(Oraahdii Muuse Xaaji Abees)

Muuse Xaaji Abees wuxuu ka mid ahaa Musharaxiintii Jagada Madaxtinio u soo istaagay sanadkii 2001-dii ee la tartamay Jaamac Cali Jaamac, markii danbena ka biyo diiday Doorashadaas, isagoo ku eedeeyey maamulkii Waqtigaa la doortay ee Jaamac Cali Jaamac inay doorashada Puntland u ay u adeegsadeen Hantidii shacabka Puntland, waxayna isaga iyo siyaasiyiin kale ka biyo diideen doorashadaas



Anigoo oo ay aad iigu fog-yahay Afekerka iyo la socodka dhaqdhaqaaqyada lagu jabay ee 20-ka sano ka jiray guud ahaan Soomaaliya, gaar ahaanna Puntland State of Somalia, ayaan maanta si diiran u soo dhoweynayaa Xubnaha Maamulka cusub ee Gobolka Bari iyo Degmada Boosaaso loo magacaabay, waxaana ugu hambalyeynayaa Madaxweynaha Puntland go'aanka iyo xulashada wacan ee uu ugu doortay Guddoomiyaha Gobolka Bari Cabdixaafid Cali Yuusuf iyo Guddoomiyaha Degmada Boosaaso Maxamuud Faarax Beeldaaaje.

Runtii, Mas'uuliyintaas xilalka culus loo magacaabay waqtigaan aad xasaasiga u ah, Boosaasona ammaankeedu ciriiri galay waayadan dambe, waa rag aan si fiican u aqaan oo aan si weyn ugu kalsoonahay, waxaana (RST) uga rajaynayaa in uu u fududeeyo wajiibgudashadooda, wax la qabto, ayna ku guuleystaan fulinta caddaaladda, ceqaabidda daallimiinta dilka hawlaha ka dhigtay iyo in bulshadu nabad ku seexato, kuna soo toosto, inshaa Allaah.

Dhammaan intii dad islaam ah lagu aamini karo ayaan ku aqaan Cabdixaafid Cali Yuusuf iyo Maxamuud Faarax Beeldaaaje oo ah, aqoon dhanwalba ah, iimaan buuxa, deganaansho, asluub, dulqaad, xilkasnimo, dadaal iyo dadla-dhaqan suuban.

Waxaan ku kalsoonahay in ay yihiin madax xilkooda garan kara, wadashaqayn iyo wada tashi yellan kara, shacabka kasban kara, una soo joogsan karaan, gacanna shaqadooda ku siin karaan, aaminaad darteed, inshaa Allaah.

Waxaan kaloo rajo iyo kalsooni ku qabaa in wadashaqayntoodu horseed u noqoto xasiloonaada Puntland, Gobolka Bari iyo gaar ahaan in nabad waarta iyo heshiis buuxa laga gaaro fidmadii naxdinta lahayd ee hore uga dhacday nawaaxiga Igdhays.

Sidoo kale, waxaan Hoggaanka iyo Maamulka Puntland ugu ham

balyeynayaa culayskii iyo xilkii ay hadda ka hor iska saareen xasiloona-xumadii ku baahday Gobolka Mudug, gaar ahaan Gaalkacayo iyo Maamulka xilkaska ah ee loo magacaabay, ilaa waagaasna waxbadan ka beddelay sidii hore wax u ahaayeen, waana in halkaas hore looga sii wado in la isbadbaadiyo, si sharaf leh loogu wada noolaado, meeshana ay ka baxdo (QAB-QAB DHAAFTAY, ISMUTUXIN IYO WAX ISMOOD HUNGO IYO HALAAG AH, ADDUUN IYO AAKHIROBA).

Waxaa lagama maarmaan ah in Maamulka Puntland badiyo feejignaanta, xoojinta xasiloonaada, xisaabtanka iyo in bulshadu dhaqso uga soo kabato dib u dhacii iyo dhaawacyadii hore u soo maray, lana gaaro iskaashi, wada shaqayn iyo is-aamin Maamulka iyo shacabku yeeshaan kor iyo hoos, lana ciribtiro wax kasta oo shaki iyo shuhubo keeni kara, waxaana la isku aamini karaa ku dhaqanka shareecada islaamka, in laga wada cabsado Allaah, caddaaladdu ka hirgasho Puntland, iyo in Madaxda Sare ee Puntland ka soo baxdo ballanqaadyadii ay hore u galeen, (doorashadii ka hor) inshaa Allaah.

Mudane Madaxweyne, waxaan aaminsanahay in dadka intooda badani yihiin hawlkar iyo daacad wax ka hanan kara ka qaybqaadashada dhismaha iyo horumarinta dalka, waxaase muuqaalkooda qariyey, kana dheereeyey in yar oo danaystayaal ah oo meel walba taagan, waxaana lagu soo saari karaa dadka daacadda ah ee dahson in Maasuuliyiinta dalku awoodda maskaxdooda isticmaalaan, kana soo dhexsaaraan dadkaas bulshada, deg-degna uga hortagaan oo u qabtaan kooxaha u dhardhigtay musuqmaasuqa, qabyaaladda, eexda, goboleysiga, dilka iyo diradirada, waxaana aad khatartoodu u badan tahay markay ku gabbanayaan maskab dawladeed, laga bilaabo Wasiir ilaa Agaasime Waaxeed, xagga ciidammadana Xiddigle ilaa Jeneraal.

EEG BOGGA 7AAD

MA SAXBAA U DABBAALDEGGA DHALASHADII NABIGA SALLALAAHU CALAYHI WASALLAM?

Waxa ay isku mashquuliyeen dad badan oo Muslimiinta ka tirsan bisha Rabiicul Awal ee sanad walba in ay u damaashaadaan wax ay ku magacaabaan Mowliidka. Marka arrinta u baahan in si qoto dheer loo ogaado waa asal ahaan meesha uu ka soo jeedo Mowliidka. Arrimaha noocan oo kale ah marka la rabo in guntooda laga yool gaaro, waxaa lagama maarmaan ah in loola noqdo dadka ehelka u ah aqoonta diinta islaamka.

Haddii dadku ka dambeeyaan culimada, waxa aan shaki lahayn in ay hari lahayd ilaaq badan oo ay soo celceshaan dadka qaarkiis. Dadkaas waa kuwa iyaga oo aan cilmiga ka waraabin ceelka runta ah, misana la kulmay kuwo indhaha ku kala qaaday dhul bidco ku baahday. Isla markaana ka carara, dadkana ku dira kuwa ku taagan dariiqadii Rasuulka- Sallaahu Calayhi Wasallam (Salafka Saalixa ah)

Haddii aan u kuur galno asalka uu ka soo jeedo Mawliidka, waxa aan ogaanaynaa in uu ka yimid dad aan islaamka asal iyo farac midna ku abtirsan. Taasna waxa daliil u ah qoloda sheegata in ay dadka kale ka xigaan Nabi Ciise Nabad galyo dushiisa ha ahaatee, ay u damaashaadaan waxa ay ku sheegaan maalinta uu dhashay Ciise Nabad galyo dushiisa ha ahaatee.

Udabbaaldegga dhalashada dadkii geeriyooday waa shay ay nooga horreeyeen ummadihii hore. Waxaase yaab iyo amakaag noqotay, dadka Muslimiinta ah oo lagu yiqi in aysan sina uga qaadan wax la xiriira diintooda cid aan ahayn ilaahay iyo Rasuulkiisa- Sallaahu Calayhi Wasallam, in sidii gaalada ay iyana u damaashaadaan waxa ay ku sheegaan Mawliidka. Waxay kaloo caddeeyeen dadka aqoonta u leh cilmiga Taariikhda in ay ahaayeen dadkii ugu horreeyay ee u dabbaaldega Mawliidka Faadimiyyiintii maamuli jirtay dalka Masar, Waxay kaga daydeen bidcadaas gaaladii kula noolayd waddankaas. Mana ah Mawliidku shayga kaliya ee ay kaga daydeen, ee waxay kaloo ka qaateen “Tusbaxa”. Annaga oo aad ula yaabi jiray isticmaalka Tusbaxa, ayaa Nin ka tirsan Qurbo-Joogta reer Puntland waxaa uu booqasho ku tagay gobol ka tirsan dalka Maraykanka oo la yiraahdo Minnesota. Halkaasna waxay ku soo arkay dukaan lagu iibsho Tusbaxyada. Wixii ugu horreeyay ee maskaxda qofkaas ku soo dhacay waxa ay ahayd. War dalkanna ma suufiyaa soo gashay? Waxa isla markiiba uu ninkaas raggii la socday ku yiri: War ba gaariga ii hakiya aan weydiiyee dadka dukaanka leh waxa

ay ka wadaan Tusbaxyada. Waxa ay dadkii dukaanka lahaa ku warameen in Tusbaxu uu yahay shay ay isticmaalaan dadka aaminsan Kirishtaanka. Taasina waa marag ma doonto in dadka quluubtoodu ka wabaxday bidcadaas ay ka dhaadhiciyaan caammada Mawliidka iyo Tusbaxaba in aysan bidco ahayn. Si loo ogaado waxa saxda ah iyo waxa aan saxda ahayn, waxaa lagama maarmaan ah in wax walba loo cesho Diinta Islaamka. Waxa aan shaki lahayn in xal waara loo helayo waxyaabo badan oo dadka qaarkiis u haystaan diin haddii kitaabka & Sunnaha lagula noqdo. Sidaas darteed waa in aan ogaanna in aysan marna bannaanayn in diinta lagu soo daro wax aan ka mid ahayn sida Mawliidka.

Maxaa yeelay haddii uu ahaan lahaa wax fiican, waxaa nooga hormari lahaa Rasuulkeennii, Asxaabtiisii iyo dadkii noolaa seddexdii qarni ee fadliga badnaa ee Islaamka ugu horreeyay.

Waxaa ka mid ah Nusuusta reebaysa bidcadaas Mawliidka.

1. Ilaah Qur'aanka waxa uu ku yiri:- “ Wax allaale wixii wanaagsan oo Rasuulku idin faro yeela, waxa allaale wixii xun oo uu idiinka reebana ka har [Al-xashri].
2. Rasuulka ilaahay waxaa idiinka sugnaatay ku dayasho wanaagsan “ [Suuradda: Axsaab]
3. Nabigana waxaa laga wariyey axaadiis badan oo ka digaysa bidco oo dhan, gaar ahaanna kuwa la mid ka ah Mawliidka. (a) “ qofkii ku soo dara shay aan ka mid ahayn diinteenna, waxa uu noqonayaa shaygaasi mid baadil ah” [Bukhaari iyo Muslim]. (b) “ hadal waxaa ugu khayr badan kan ilaahay. Hanuunna kii Nabi Muxammad Calayhi salaatu wasalaam, sharna waxaa ugu daran bidco, bidco dhammaanteedna waa baadilnimo”. (c) “ Ummaddayda dhammaanteed waxa ay galayaan Janno, illaa mid diida mooyee. Markaasaa Rasuulka lagu yiri: oo yaa janno diida? Qofkii aniga i addeeca waxa uu galayaa Janno, kii i caasiyana janno waa uu diiday “[Bukhaari].

Haddaba daliilahaas ka dib waxaa qof walba oo Muslim ah la gudboon in uu ku waano qaato, oo uu ilaahay ugu dhawaado waxa uu u jideeyay oo keliya.